Portland Public Schools

Dayrta 2020: Wararkii ugu dambeeyey Ogosto 14

Ogosto 14, 2020

Qoysaska Qaaliga ee PPS,

Waxaan jecelnahay inaan idinla wadaagno wararka cusub ee labada todobaad ee ugu horeeya sanad-dugsiyeedka iyo arrimo kale oo dhowra. Sidii caadada ahayd, waxaad ka heli kartaa macluumaadkii ugu dambeeyey iyo agabyada kaleba marka aad booqato shabakada pps.net/fall2020.

Iyada oo aan ku soo dhawaaneyno Sebtamber 2deeda, waxa aanu idinla wadaagi doonaa arrimo muhiim ah kuwaasi oo ah, macluumaad dareenkiisa waqtigu wata oo aad ku heli doontaa dhowr kanal, waxaana ka mid ah fariimaha degdeg ah (text) iyo email labadaba. **Haddii aanad wali dooran inay PPS kugula soo xiriirto fariinta degdega ah,waxa aad sameyn kartaa adiga oo fariin degdeg ah u soo diraya lambarkani 68453 kuna jawaabaya"Haa" ama "Maya".** Fadlan waxaad ogaataa in xiriirka ay PPS kuugu soo dirayaan fariinta degdega ahi inay ku salaysan tahan wax kooban.

MUHIIM: "BILOW JILICSAN" (SOFT START) IYO JADWALADA CASHARADA MAALINLAHA AH WAXAA LA IDINLA WADAAGI DOONAA TODOBAADKA SOO SOCDA.

Ardaydu waxa ay ka heli karaan PPS Kumbuyuutaro

Ardayda aan guryaha ku haysan kumbuyuutaro waxa ay ka daysan karaan PPS. Fadlan waxaad la xiriirtaa si toosa iskuulkaa wixii macluumaad dheeraad ah ee ku saabsan.

Inaad taqaanaa sida loo isticmaalaa kumbuyuutarada PPS iyo waxbarashada dhammeystiran ee guryaha lagu qaadanay waxa ay xudun u tahay sidii ay ardaydu waxbarashadooda ugu guuleysan lahaayeenxilliga dayrta. Todobaadka soo socda waxa aanu soo bandhigi doonaa fursado wacyi-galin maqal iyo muuqaal ah, agabyo iyo fiidiyaal caawinaya ardayda iyo qoysaska sidii ay ula qabsan lahaayeen teknoolajiga ay isiticmaali doonaa inta waxbarashada lagu qaadanayo online. Waxa aanu sidoo kale idinla wadaagi doonaa sidoo kale faahfaahin ku saabsan Xarun La Waco iyo Goob Teknoolajiga Ka Caawisa ardayda iyo qoysaska bilowga todobaadka soo socda. Xaruntani la wacayaa waxa laga heli karaan dhammaan shanta luqadood ee PPS taageerto.

Qorshayntii Waxaa Loo Gudbiyey Waaxda Waxbarashada Oregon (ODE)

Portland Public Schools 2020 FALL Relmagining Education During the Pandemic

Dugsiyada Dadweynaha Portland (PPS) waxa ay u gudbiyeen Qorshihii Hawlgalka 2020-21 todobaadkani. Waxaa jira amuuro badan oo dukumentigani diirada saarayo, laakiin waxa aanu iftiiminayaa afar qeybood oo muhiim ah, marka la raaco shuruudaha Waaxda Waxbarashada Oregon marka la eego. Waxa ayna kala yihiin: Xaaladaha tacliimeed ee dhammeystiran guryaha lagu qaadanayo, Baahiyaha Waxbarashada Dijitalka ee Dhammeystiran Waxbarashada Guryaha Lagu Qaadanayo, Sinaanta Jinsiyadaha Ardayda iyo Sida Waxbarashada Si Siman U Wada Heli Lahaayeen, iyo Sidii Qoysaska Looga Taageeri Lahaa Waxbarashada Maqalka iyo Muuqaalka ah ee Guryaha Lagu Qaadanayo. Dhowrkaasi amuuraad ayaa diirada lagu saaray iyaga oo faahfaahsan Kulankii Golaha Waxbarashada ee qabsoomay maalintii Tallaadadii aan soo dhaafnay. Qorshahayagu wuxuu wargalinayaa habka loo gudbinaye iyo qaabka loo dhigay (Theory of Action) iyada oo la raacayo ujeedadda Waxbarashada Guryaha Lagu Qaadanayo ee Dhammeystiran :

- Dhammaan ardaydu waxa ay maalin walba oo todobadka ka mid ah ka qeybqaadan doonaa waxbarasho dhammeystiran.
- Maalintii waxaa loo maareyn doonaa waxbarashadooda iyada oo macallimiintu ay si toosa waqti muhiim ah ula qaadan doonaa ardayda si diirada loogu saaro inay waxbarashada iyo hawlaha ay qabanayaan u noqdaan kuwa macno sameynaya.
- Qoysasku waxa ay dhammaan heli doonaan taageero iyo tababaro diirada lagu saarayo qalabka dijitalka ah ee ay waxbarashada ardaydoodu ku qaadaneyso.
  Waxbarashada Dhammeystiran ee Guryaha Lagu Qaadanayo waxaa ku jira udub dhexaad u ah casharo ay soo diyaariyeen macallimiintu, iyo addeeg gargaar oo ka imanaysa dugsiyada degmada oo dhan.

Marka aad eegto dhinaca addeegyada gargaarka, waxa aanu ku faraxsanahay in aan idinla wadaagno in la kordhiyey tirada la-taliyaasha iyo shaqaalaha bulshada ee dugsiyada degmada iyada oo lagu biiriyey gargaarayaal caafimaadka xiska ka caawiya ardayda. Saaxiibadayada aan iska taageersano caafimaadka xiska sidoo kale waxa ay bixin doonaa addeegyo telefoonka ay ka daaweynayaan. La-taliyaha ardaydiina ayaa idin siin doona macluumaad dheeraad ah, haddii aad xiiseyneysaan in aad wax badan ka ogaataan. Waxa aanu sidoo kale la shaqeyneynaa hay'adaha saaxiibadayada ah ee dhaqanada gaarka ah leh sidii ay gargaar ugu fidin lahaayeen qoysaska in laga taageero waxbarashada ardayda lana yareeyo caqabada ku gudban qoysaska aan cadaanka ahayn sidii loo doodi lahaa baahiyaha ardaydooda. Saaxiibadayadu waxa ay sido kale siin doonaa addeegyo isku sidkan oo ay ka mid yihiin in waxbarashada laga caawiyo, waqtiga waxbarashada loo dheereeyo iyada oo loo fudeydinayo, iyo in la qorsheeyo sidii loo horumarin lahaa dhaqan caafimaad qaba oo horumarsan.

Waxa aynu ka warqabnaa in xanuunku si ballaaran u dhibaateeyey ardayda iyo qoysaska aan cadaanka ahayn. Habkayaga aan u gudbineyno, sida aan Mudnaanta u Siineyno Maalgalinta Koontada Ardayda, iyo dadaalada loogu jiro sidii Sinaanta dhinaca Jinsiga iyo Cadaalada Bulshada u noqon lahaayeen mid si joogta ah nooga go'an in aanu siino mudnaanta ardaydayada aan cadaanka ahayn, gaar ahaan ardayda madowga ah iyo ardayda Asalka Maraykan ah. Xanuunkani nagama joojin karo shaqadani.

Portland Public Schools

2020 FALL

Relmagining Education During the Pandemic

Hoggaamiyaasha PPS waxa ay u soo bandhigeen dulmarka guud ee qorshaha maalintii Tallaadadii Golaha Waxbarashada kulankoodii. Waxaad ka daawan kartaa bandhigaa marka aad gujiso halkani.

Qaybinta Cunta ee PPS: Maalmaha Muhiimka ah iyo Isbedelada

Waxa ku hanweynaha in aan idinla wadaagno in aanu qeybiney **wax ka badan hal milyan oo cunto ah** laga soo bilaabo ilaa iyo intii iskuulada xidhay bishii Maarso. Waxa ay noo tahay sharaf weyn in aan cunto u qeybino ardaydayada, gaar ahaan waqtigan.

Fadlan waxaad ogaataan in **maalinta ugu dambeysa addeega cunto qeybinta ee xilliga xaggaagu inay tahay maalinta Khamiista ah, bisha Ogosto 20keeda.** Waxa aanu dib u bilaabi doonaa cunto qeybinta aan ka bixin jirnay 36 goobood oo ka kala tirsan iskuulada degmada oo dhan maalinta Arbacada, bisha Sebtamber 2deeda. Waxa aanu soo saari doonaa liisto dhammeystiran oo goobaha iyo waqtiyada qoysaska ay ka heli karaan cuntada todobaadka soo socda, marka aan dhammeystirno faahfaahinta.

Ugu dambeyn, waxaan idin xusuusineynaa iskuuladeenu waa xiran yihiin amarka ka soo baxay hay'ada caafimaadka gobolka- oo ay ka mid yihin garoomada iskuulada iyo goobaha kale ee ardaydu ciyaaraha kala gedisan ku ciyaaran. Nasiibdaro, waxa aynu aragnay in ay soo kordheyso dhibta loo geysanayo hantida dhismaha iskuulada iyo sawirada lagu xardhayo qaar fara badan oo ka mid ah iskuulada intii aan ku jirnay fasaxa xaggaaga. Haddii hayso wax caddeyn ah in arrintani iskuulkaaga, waxa aanu jecelnahay in aad la xiriirto xafiiska Hawlgalada iyo Dayactirka ee telefoonka 503.916.3303. Waad mahadsan tihiin.

Waxa inoo soo socda waxyaabo fara badan todobaadka soo socda, oo ay ka mid yihiin jadwalka rubuca iskuulka oo fasal kasta ah, macluumaad ku saabsan wacyi-galinta iyo gargaarka teknoolajiga, ballaarinta goobaha laga qeybiyo cuntada, iyo faahfaahin ku saabsan munaasabadeena soo socoto ee Ku Xirnow Xannaanada PPS. Sidaas darteed, waxaan idiin rajeyneynaa caafimaadqab iyo fayo-qab. Waxaan idiin rajeyneynaa todobaad wanaagsan.